

# 2022

## MINNESOTA FOOD SHELF SURVEY



### CODKAAGU WUXUU GACAN KA GEYSANAYAA INAY HORUMARAAN SHELAFYADA CUNTADU!

#### KA QEYBQAADASHADU WAA:

- **Mid fudud:** Wakhtiga sahanku waa 10 daqiiqo ama wax ka yar
- **Qarsoodi:** Jawaabahu waxay noqon doonaan 100% qarsoodi
- **Ikhtiyaari:** Waajib maaha ka qeybqaadashadu; ma saameyn doonto helitaanka shelafka cuntada iyo adeegyada kale



#### Unique Food Shelf Name

Unique Food Shelf Survey Link

*Si loo helo codad badan oo kala duwan, fadlan qoyskii kastaaba ha soo gudbiyaan hal sahan.*

#### SAHANKA WAXA LAGU HELI KARAA:

- Ingiriisi
- Isbaanish
- Soomaali
- PyccKll111
- Hmoob

#### SAHANKA WAXA LA SAMEEYAY IYADOO LALA KAASHANAYO:



#### BAYAANKA TAKOOR LA'AANTA EE USDA

*Dhammaan hay'adahu waa fursad iyo shaqo bixiyeyaal loo siman yahay. Wixii macluumaad intaa dheer ee ku saabsan siyaasada takoorka la'aanta ee USDA ama si aad wax uga weydiiso gudbinta cabashada, booqo <http://z.umn.edu/u76>.*



**Waxaa lagugu casuumay inaad ka qeybqaadato sahaminta gobolka oo dhan ee macaamiisha shelafka cuntada ee ku kala nool daafaha gobolka Minnesota!** Sahankan ayaa naga caawin doona inaan si wanaagsan u fahano baahiyaha iyo dookhyada macaamiisha si aan u hagaajino helitaanka cuntada iyo waxyaabaha lagala kulmo shelafka cuntada. Mahadsanid!

Natiijooyinkii Sahanka Gobolka oo dhan ee 2019 [www.supersshelfmn.org](http://www.supersshelfmn.org).

**Arimahaaga gaarka ah waa la ilaalin doonaa, diiwaannada sahankana waxaa loo keydin doonaa si ammaan ah.** Wax xog ah oo lagugu aqoonsan karo looma isticmaali doono warbixin kasta oo la sameeyo ama la daabaco. Jawaabaha su'aalaha furan waxa laga dhigi doonaa qarsoodi haddii odhaah la soo xigto.

**Sahankani waa ikhtiyaari.** Go'aankaaga ka qeybqaadashada ama ka qeybqaadasho la'aantu ma saameyn doono adeegyada cuntada ee aad hesho imika ama aad heli doonto mustaqbalka. Haddii aad go'aansato inaad ka qeybqaadato, xor ayaad u tahay in aanad ka jawaabin su'aasha aad doontid ee sahanka ku jirta.

Sahankan waxaa isku dubariday Emily Becher oo ka socota University of Minnesota. Wixii su'aalo ah, kala xidhiidh iyada:

[bech0079@umn.edu](mailto:bech0079@umn.edu) | 612-624-3335

495 Coffey Hall, 1420 Eckles Ave, St. Paul, MN, 55108

Sahankan waxaa dib-u-eegay IRB ka tirsan Barnaamijka Ilaalinta Daraasaadka Aadanaha (HRPP) ee University of Minnesota. Maadaama ay qarsoon yihiin jawaab bixiyaashu, waxa la go'aamiyay in "aanay ahayn daraasad ku saabsan aadanaha". Si aad si gaar ah ula wadaagto HRRP jawaab-celin ku saabsan khibradaada sahanka, ka wac Khadka u Doodaha Ka Qeybqaatayaasha Daraasada 612-625-1650 ama booqo <https://research.umn.edu/units/hrpp/research-participants/questions-concerns>.

---

**Barnaamijka Kaalmada Nafaqada Kaabista ah (SNAP) wuxuu kaalmo nafaqo siiyaa dadka dakhligoodu hooseeyo. Wuxuu kaa caawin karaa inaad iibsato cuntooyinka nafaqada leh si aad u hesho cunto fiican. Si aad wax badan uga oggaato, kala xiriir Khadka Caawimada Cuntada ee MN lambarkan 1-888-711-1151.**

**Agabkan waxaa qeyb ahaan maalgeliyey Barnaamijka Kaalmada Nafaqada Kaabista ah ee USDA - SNAP-Ed - iyo lacagta laga helay lana soo mariyay Waaxda Adeegyada Aadanaha ee Minnesota.**